

# Ardeydii Dhagaxtuur iyo Dhiiranaantii

## Axmed Maxamed Yuusuf “Jabane”

Febraayo 20,2014  
Mareegaha Farshaxan

Qaybtii 4aad...

*Labadii dhukane      Wali waa dhankii;*  
*Dhanaanaatayoo      Dhux dhux baa jirtoo*  
*Way dhaharatoo      Talo dhacantabay*  
*Dhirin dhirinayaan      Dhegna looma laha,*  
*Laysu jilib dhigyoo      Runta laysu dhiib*  
*Lama dhawr sanine      Baha dhuux ku nool*  
*Dhacabaa la yidhi      Dherigii karyoo*  
*Dhardhaaradii burbure,      Dhaantiyo ammaan*  
*Dhagdhagtii la waa      Dhidhkiibaa dam'qaday*  
*Dhaymo looma helin,      Dhebi iyo maraa*

*Loo kala dhaqaaq;*

Maansada “Dhimashada Xaqa ah ahi waa dhaqan wadani” , Abwaan Aadan Tarabi Jaamc

Waxaa runtii mudan in lays dul taago xeerarkii laga jeediyey Maxkamad ku-sheegtii.Xeerarkani waxay ahaayeen kuwo in badan la adeegsadey, dan gaar ahna u fulinayey xukuumadii Afweyne. Sidaa darteed ayaanu raadsaney sharci-yaqaan mudane Ibraahin Xaashi Jaamac si uu inoogu balbalaadhiyo xeerarkani.Waxaanu mudane Ibraahin yidhi: “Af Weyne ayaa soo saaray 10<sup>kii</sup> bilood ee ugu horeeyey gudahood markii uu xukunka maroorsaday.Dad aad iyo aad u fara badan ayaana loo adeegsadey dilkoogii iyo xadhigoogii .Waxaana adeegsatey Maxkamad

Badbaadad ku sheegtii laakiin ahayd “Bohol ku ridda dadka” . Waan kaydiyey xeerar ku sheegayadaas oo marbaan ku soo dari mareegta“Somalilandlaw.com” si aan loo ilaawin.

Xeerarka iyo qodobada lo adeegsadey dhalintii UFFO waxay kala ahaayeen sidan hoos ku dhigan,waxaana ku ladhan gu’gii iyo bishii uu xeer waliba soo baxey ama ay samaysatey xukuumadii Afweyne:

1-Qodobka 3aad ee xeerka 54 soona baxey 10kii bishii 9aad 1970,

2-Qodobka 3aad firqadiisa 1 ee ee xeerka 54 soona baxey 10kii bishii 9aad 1970,

3-Qodobka 19 ee xeerka 54 soona baxey 10kii bishii 9aad 1970,

4- Qodobka 21aad ee ee xeerka 54 soona baxey 10kii bishii 9aad 1970,

6- Qodobka 71 ee xeerka ciqaabta benal Koodhka (penal code)

7- Qodobka 103 iyo 104 ee xeerka 71 ee ciqaabta benal koodhka (penal code)

Mar kale ayuu mudane Ibraahin waydiinay inuu bal si kooban inoogu sheego waxay xeerarkani ahaayeen.Isagoo Ibraahin xeerarkaa faahfaahinaya ayuu yidhi: “Xeerkani waxa la odhan jiray “Law for Safeguarding National Security” oo qodaban aad soo sheegtay waxay ka hadlayeen sidan:

Xeerka 54, qodobka 3: Cidda Abaabusha ama ka qayb qaadata abaabulka ururo kacaan-diid ah waxay mudan yihiin in kuwa abaabulay lagu xukumo dil toogasho aha, halka kuwa kaalmeeyey ay xabsi daa’in (Madaxaa ha ku futro) lagu qaadayo.

Xeerka 54 , qodobka 19 hanashada, lahaanshaha , ama haysashada qalab kacaandiidnimo waxaa lagu mudnaayaa ciqaab dhan 5 gu’ ilaa 15 gu’

Xeerka 54aad qodobka 21 A ku kicitaanka Afmiinshaarnimmo waxaa lagu mudanayaa xadhiga u dhaxeeya 2 bilood ilaa 2 gu’ .”

Mar kale ayuu mudane Ibraahin ka wamey inaney xeerakaasi lagu gumaadayo bulshadu intaa u ekayn ee mar walba lagu jorhinaya qaar sii xoojinaya gumaadka iyo tirtirka dadka lala maagan yahay. Waxaanu yidhi mxeer-yaqaan Ibraahin: “ Xeerarkan aad bay ay u isticmaali jirtay maxkamad ku sheegtaasi, qaar kalena waa lagu sii kordhiyey. Halka ay 80taneeyaddii intii ugu dambeysanna xitaa xeerarkaas mayba soo hadal qaadi jirin oo dadka waa layska layn jiray, qaarna maxkamdu military ayaa si deg deg ah dilka wadar ahaan u soo saari jirtay”.

Hab-dhaqanka dawlada aan ku salaysnayn sharci la raaco iyo xeer ayaa had iyo jeer lagu yaqaanaa inay xalin kari waydo dhibaatooyinka yimaada. Waxaana dhibaatooyinka hormood u ah markay dadku gadoodaan ama danahooda iyagu gacantooda ku qabsadaan. Markii ay hawsha samo-falka bilaabeen kooxda UFFO ayaa si loo boqno-gooyo hawshaa loo soo diray wasiir ka soo jeeday gobolada Soomaaliland. Hawlahani samo-falka ahi waxay dawladii Afweyne tusayeen inay xilkeedii gabtey, dadkuna aaney u dulqaadan doonin.

Sidaa darted ayaa la soo diray Axmed Maxamed Maxamuud (Ina laxwas) iyo Axmed Maxamed Maxamuud (siilaanyo) oo ka tirsanaa golihii wasiirada. Waxay aad isugu dayeen inay dhalinyarada iyo odayaasha kala fogeeyaan, hase yeeshee odayaashii iyoganacsadayaashii xilligaasi ayaa talo ku soo gooyeye inay dhalinyaradu waxay doortaan iyaguna u hogaansamayaan. Labadaa wasiir waxay arintaasi ku noqotay af-kala qaad dhan ay u qaadaana way garan waayeen. Waxaase kaga sii darnaa waxay Afweyne kula noqonayaan iyo siday wax ugu sheegi doonaan. Faro madhnaan ayey Hargeysa kaga caraabeen labadaasi wasiir. Hase yeeshee ilaa maanta waxaa iswaydiin u baahan waxay filayeen inay Afweyne kula soo guyo noqon-doonaan.

Bishii Febraayo 20, 1982 markii kacdoonkii ardeydu dhacey ayaa mar labaad la soo diray wafdi ka balaadhan kaasi oo loo tirinayey inay wax isku biirin doonaan dadkana kala jajabin doona. Waxaana wafdigaa mar labaad hogaaminayey Axmed Maxamed Maxamuud (Ina laxwas), waxaana ka mid ahaa Jaamac Gaas Mucaawiye, Axmed Saleebaan Dafle iyo Xasan Suudi (Guulwade darbane).

Hase yeeshee waxaa socdaalka wasiirada la yaabey dadkii. Abwaan Cali sugule oo mid ahaa dadweynaha socdaalkani ujeedadu xambaarsan yahay ka dariyey ayaa isagoo ka hadlaya yidhi: “Waxaa la ii sheegay magacda wasiirada la dirayo, dhaqanka sidaas ahaa in loo tirinayey inay

halkaa(wadanka Soomaaliland) ka soo jeedaan, aniguse waan ogaa inaaney waxba qaban kareyn oo iyagaaba u baahnaa in la xoreeyo waaneyse is-ogayn”.

Sidoo kale ayuu abwaanku arintaa maasno taariikhda ku galiyey:

*Waxay Deeqi tidhi  
Dulli Jaamac Gaas  
Guulwade darbane  
Waxa igaga daran  
In Dafle iyo in Dayla kude  
Laba dulli maqaar  
Waa qaar damboo  
Degma Caabudwaag  
Ku Darleefaye  
Iyagaa dulmanoo talo dawladeed  
laga dayriyee loo doodayaay  
Laba doqon-maqaar maxay doonayaan*

la soco qaybta shanaad

Tixraac:

-Taariikhda iyo Waxqabadii Dr. Aadan Yuusuf Abokor

Wareyste: CabdiShakuur Xaaji Muxumed Muuse (Heersare)

-Note on My teachers' group

Qore: Jaamac Muuse Jaamac

- Dhacdadii Dhagaxtuur iyo Dhiiranaantii Dr.Maxamuud Sh.Xasan Taani

Qore . Fu'aad Sheekh

- Ardaydii Dhagaxtuur iyo Dhugashadii. Maxamed Baaruud Cali.

Qore . Fu'aad Sheekh

-Wareysi Sharci-yaqaan mudane Ibraahin Xaashi Jaamac..

Wareyste: Bahda Mareegta Farshaxan

Diyaarintii iyo tifatirkii :

Fu'aad Sheekh

Bahda Mareegta Farshaxan